Xuquuqahaaga Amaanka haysiga

Homes for Islington
improving housing through partnership

HFI waa ALMO, tan macnaheedu waa in HFI ay maamusho dhamaanguryaha iyagoo matalayo Golaha maamulka degmada ee Islington (Islington Council).
Islington Council weli iyaga ayaa ah guri-kireeyahaaga. Hanti-kiraystayaasha golaha maamul degmeed badankoodu waa hanti-kiraystayaal ku sugan kiraysi amaan ah, si hoos timaada Sharciga Guryaha ee 1985. tan macnaheedu waa in aanan guriga kaa saari karin anagoon u tegin maxkamad oo weydiisan amar dib-ula noqosho. Waxaa khasab nagu ah in aanu maxkamadda u caddayno in aanu raacayno mid ka mid ah sababaha dib-ula noqoshada ee lagu qoray Sharcia Guryaha ee 1985.

Waxaanu dalban karaa Amar hanti Dib-ula noqosho haddii:

- Aad lacagta kiradaada bixin weydo
- Adiga, qof qoyskaaga ka mid ah (oo ay ku jiraan caruur) ama qof ku soo booqday uu rabshooyin ku sameeyey dadka kale ee degsiimada
- Adiga ama qoyskaaga ama qof ku so booqday uu waxyeelo u geysto gurigaaga ama dhismaha degsiimada ee aad ku nooshahay
- Aadan ugu noolayn hantida si ah gurigaaga keliya ama ugu weyn
- Aad ku heshay kiraysigaaga bixin aad bixisay warbixino been ah
- Aad ogolaato in gurigaaga loo isticmaalo hawlo sharci daro ah ama
- Uu Golaha Maamulka degmadu (The Council) doonayso inuu burburiyo ama uu shaqo weyn ka qabto gurigaaga

Fadlan xasuusnow, haddii aad ilaalin weydo shuruudaha heshiiska kiraysigaaga, waxaad waayi kartaa gurigaaga.
Kiisaska dhamaantood waxaanu door bidnaa inaanu xalino dhibaatooyinka ka hor int aanan maxkamad tegin. Haddii aanu maxkamad kula aadno, waxaanu kugu dhiirigelinaa inaad doorato metele sharciyeed oo ku difaaca. Maxkamaddu waxay samayn doontaa go'aan ku salaysan cadaymaha la soo bandhigay.

Mas'uuliyadahaaga
HFI waxay higsataa inay ku dhaqmaan hanaan macmiisha mudnaan la siinayo marka ay bixinayaan adeegyo guriyeed. Waxaad nagu caawinaysaa inaad u heelanaato inaad ku dhaqanto heshiiskaagii kiraysiga.
Mas'uuliyadahaaga ugu waaweyni waa:

- Inaad lacagta kiradaada u bixiso qadimaad ahaan (wakhtigeeda)
- Samaysid dayactirada aad mas'uulka ka tahay
- Dayactiadaada si degdeg ah ugu soo gudbisid HFI Direct, telefoonka 0800 694 3344
- Noo ogolaatid anaga iyo qandaraaslayaashayada in aanu soo galo gurigaaga si aanu baadhitaan ugu samayno ama aanu u samayno wax dayactir ah ama aanu u samayno baadhitaan badbaado gaas
- Inaad daryeesho hantidaada iyo meelaha dadka ka dhexeeye
- Aad na siiso ogaysiis 4 isbuuc ah haddii aad go'aansato inaad joojiso kiraysigaaga
- Aad hantida ugu noolaato si ah gurigaaga keliya ama ugu weyn
- Aadan qashinka uga takhalusto si sax ah oo aadan ku tuurin hantidaada horteeda ama meelo dhismaha degsiimada ah

- Aad hesho ogolaanshahayaga oo qoraal ah haddii aad:
  - Doonayso in aad wax ka bedelid ama wax ku darid ku samayso gurigaaga
  - Doonayso inaad ku rakibto eeryal ama saxan satalayt gurigaaga debaddiisa
- Aad raacdo xadiddaadaha meelaha baabuurta la dhigto ee dhismayaashayada degsiimada
- Noosoo gudbiso wixii dhaqamada bulshada dhibka ku ah iyo baabuurta meelahaas lagaga tago
- Ahaato deris/jaaraan wanaagsan, aadana rabshooyin ku samayn ama ogolaan in qoyskaaga ama soo booqdayaashaadu rabshooyin sameeyaan

Qol-kiraystayaal
Maadaama aad tahay kirayste kiraysi amaan ah ku sugan, waxaad xaq u leedahay inaad cid qol ka kirayso. 'lodisticger' waa qof kuula nool si dhow oo ay u badan tahay inuu cuntadana kula qaybsado. Hase yeeshee shuruudaha soo socda ayaa lagu dhaqmayaa:

- Waa inaad xafiiska guryaha ee agagaarkaaga siisaa faahfaahin ay ku jiraan:
  -Magaca, da'da iyo jinsiga qol kiraystaha
  -cuntooyinka iyo adeegyad kale ee aad siin doonto iyo inta ay leeg tahay lacagta kirada ee uu qol kiraystuhu ku siin doono
- Gurigaagu waa in aanu noqon mid sharci ahaan buuq ah/dad saa'id ku yahay
- Qol kiraystahaagu waa in aanu sababin wax rabshooyin ama waxyeelo ah
- Haddii aad qaadato Gunooyinka deeqaha Guryaha, waa inaad siisaa faahfaahin waaxda Gunooyinka deeqaha Guryaha ee Golaha maamulka degmada (Council),maadaama tan laga yaabo inay saamayn ku yeelato xaddiga lacagta ee aad xaq u leedahay
- Qol kiraystahaagu waa inuu guuraa marka aad doonto oo aanu sii joogin hantida haddii aad guurto

Qol kiraystayaashu wax xaq ah kuma laha kiraysiga Golaha maamulka degmaduna wax mas'uuliyad ah uma hayaan
Kuma dari doono qol kiraystahaaga inuu ka mid yahay dadka gurigaaga ka tirsan ama kiraysiga haddii aad dalbato dalab guri bedelasho

Ka sii kirayn
'Ka sii kirayste' waa qof ku siiya kiro lacag kiro oo ku wajahan isticmaalida khaaska ah ee qol laakiin aan wax shaqo ah ku lahayn nolol maalmeedkaaga.
Sharciga Guryaha ee 1985 kuu ogolaan maayo inaad sii kirayso ama wareejiso ku sugnaanta gurigaaga oo dhan. Haddii aad sidaa samayso, waxaad waayeysaa ku sugnaanta kiraysi amaan ah, waxaadna noqonaysaa Tolerated Trespasser (Iska soo gale loogu Dulqaatay). Waxaanu qaadi doonaa talaabo aanu dib ula soo noqonayno gurigaaga. Haddii aad doonayso inaad sii kirayso qayb gurigaaga ka mid ah, waa inaad marka hore naga heshaa ogolaansho qoraal ah. Fadlan ka dalbo xafiiska guryaha ee agagaarkaaga:

- Waa inaad bixisaa faahfaahinah heshiiska aad doonayso inaad isticmaasho
- Waa inaad sidoo kale bixisaa faahfaahin ah cidda aad qayb ahaan hantidaada ka kiraynayso
- Haddii aad qaadato Gunooyinka deeqaha Guryaha, waa inaad siisaa faahfaahin waaxda Gunooyinka deeqaha Guryaha ee Golaha maamulka degmada (Council),maadaama tan laga yaabo inay saamayn ku yeelato xaddiga lacagta ee aad xaq u leedahay
- Waa inaadan gurigaaga dadka xad dhaaf kaga dhigin

Siinta kiraysigaaga qof kale-u xil-saarid iyo kala bedelasho
Waxaad keliya oo aad kiraysigaaga qof kale u xilsaari kartaa (ku wareejin) xaaladda cayiman, sida kuwa soo socda:

- Haddii aad gurigaaga kirayste kale guri kaga bedelato (kala bedelasho) aadna ogolaansho ka haysato labaad mulkiile-hantiyeed
- Si la xidhiidha amar maxkamaddeed oo ay keentay cilaaqaad burburay
- Haddii uu jiro qof kula nool oo xaq u leh inuu la wareego kiraysiga, tusaale:

- Ninka/xaaska ama lamaane bulsho (waa inay kula nool yihiin marka aad ku wareejinayso kiraysiga)

ama

- Qaraabo kula noolaa ugu yaraan 12 bilood ka hor taariikhda aad doonayso inaad ku wareejiso kiraysiga (halkan qabraabo waxaa looga jeedaa Waalid, waalidka waalidkiis, ilmaha, ilme qof ilmahiisu dhalay, adeer/abti, eedo/habaryar, ilme eed/habaryar/adeeg/abti loo yahay ama qof kuula nool lamaane ahaan oo ay ku jiraan qof aad isku jinsi tihiin.

Hase yeeshee xaq uma lihid inaad qof ku wareejiso kiraysigaaga haddii:

- Aad kiraysiga ku heshay qof ehelkaaga ah oo dhintay ama hantida kuu xil-saaray
- Aad ahayd mid ka mid ah kiraysi wadajir ah aadna markaa ka dib noqotay kiraystaha keliya ee hantida jooga

Waa inaad dalab u samaysaa xafiiska guryaha ee agagaarkaaga haddii aad doonayso inaad qof ku wareejiso gurigaaga.

La wareegid

Haddii aad leedahay kiraysi amaan ku sugan aadana adigu ku guulaysan kiraysiga, marka aad dhimato waxaa kiraysigaaga lagu wareejin karaa:

- Qof kiraysiga kugula jirey
- Ninkaaga ama xaaskaaga ama lamaanahaaga bulsho haddii ay kula nool yihiin ayna tahay gurigooda keliya ama ugu weyn, ama
- Lamaanahaaga ama xubin kale oo qoyskaaga ah oo kula noolaa ugu yaraan ka hor dhimashadaada oo gurigaaguna u yahay gurigooda keliya ama ugu weyn
- Haddii hantidu ka badan tahay baahida lamaanahaaga ama qoyskaaga wax ka badan hal qol oo hurto, ama
- Haddii gurigaaga loo qaabeeyey qof kala dhantaalan, waxaa laga yaabaa in aanay awoodin inay joogaan. Xaaladdan waxaanu siin doonaa kiraysi amaan ah oo meel kaga haboon ah

Kiraysiyo wadajir ah

Kiraysi wadajira waa ka aad la wadaagto qof kale. Macnaheedu waa in labadaba ama dhamaantiin aad mas'uul ka tihiin inaad ku dhaqantaan heshiiska shuruudaha kiraysiga oo ay ku jiraan bixinta lacagta kirada.

Waxaa kale oo macnaheedu yahay inaad leedihiin xuquuq isku mid ah oo ku wajahan kiraysiga iyo inaad ku sugnaataan hantida illaa inta uu ka dhamaanayso kiraysigu.

Kiraysi wadajir ah, mid kasta oo ka mid ah kiraystayaasha wadaaga ayaa na soo siin kara ogaysiis lagu joojinayo kiraysiga, haddii uu kiraystaha kale ee la wadaagaan ogolaaday iyo haddii kaleba. Tani waxay dhamaynaysaa kiraysiga iyo dhamaan xuquuqaha kiraystayaasha ee hoos yimaada. Markaa ka dib waxaanu dib ula noqon karaa hantida. Maxkamad ayaa laga yaabaa inay kiraysiga ka bedesho lamaane oo u bedesho lamaane kale, haddii laba is qabay ay kale guuraan. Haddii aad doonayso inaad ka edelato kirayste keligiis ah oo bedelato kiraysi wadajira, waa inaad dalab u samaysaa xafiiska guryaha ee agagaarkaaga. Waxaanu xisaabta ku dari doonaa cilaaqaadka aad la leedahay qofka kale, mudadeedu inta ay tahay iyo in lagugu leeyahay lacag kiro iyo in kale, taas oo ay ahayd inaad haddaba bixisay. Caadiyan ma ogolaano kiraysiyo wadajir ah illaa mooyee uu kiraystaha kale yahay ninkaaga/naagtaada ama lamaanahaaga.

Guri ka guurid

Bedelaado guri

Dhamaan kiraystayaasha Islington waxay xaq u leeyihiin inay ku biiraan diiwaan guriyeyn. Bedelidda waxaa la siiyaa iyadoo loo eegayo inta dhibcood ee aad haysato. Haddii aad haysato wax ka badan 140 dhibcood aadna xaq u leedahay bedelid, waxaad awoodi doontaa inaad guri cusub dalbato, adigoo u maraya Home Connections scheme (qorshaha Isku xidhnaanaha Guryaha). Fursadahaagu waxay ahaanayaan kuwo ka sii wanaagsan haddii aadan xadidin meelaha ama nooca guriga ee aad diyaar u tahay inaad aqbasho.

Waxaanu siinaa dhibco mudnaan ah kiraystayaasha leh sababo degdeg ah, oo ah inay guuraan. Kuwaas waxaa ku jira:

- Dhibaatooyin caafimaad oo khatar ah
- ‘Decant cases’ (‘Kiisaska Wanaagga) – marka dayactiro ama hagaajino waaweyn la qorsheeyo, aadna u baahan tahay inaad guurto kuwaas dartood
- Kiraystayaasha ay guryahoodu ka badan yihiin, iyo
- Kiraystayaasha khatar ugu sugan rabshooyin ama waxyeelo khatar ah

Qorshaha Isku xidhnaanaha Guryaha waxaa loo qaabeeyey inuu siiyo kala doorashooyin badan dhamaan dalbadayaasha ku jira liiska guriyeynta. Hantiyaha madhan waxaa lagu xayaysiiyaa Islington Gazette, xafiiska guryaha ee agagaarka ama bogga internet-ka ee Home Connections www.homeconnections.org.uk

Foomamka dalabashada waxaa laga heli karaa xafiiska guryaha ee agagaarkaaga. Marka aad dalbaayso bedel, waa inaad hubisaa in warbixinaha ku qoran dalabkaaga ay daacad iyo sax yihiin. Waa inaad noo sheegtaa haddii ay sinaba wax isagxaaladahaaga, maadaama tani samayn ku yeelan karto dalabkaaga.
Waxaad warbixin dheeraad ah oo ku saabsan bedelashada ka heli kartaa kooxda Dib-u guriyeynta ee telefoonka 020 7527 4140 ama 4143.
Waa omaad xasuusnaataa ina guryaha golaha maamulka degmadu ay cidhiidh yihiin. Ma awoodno inaanu caawino qof walba oo soo dalbada bedelasho. Kuwa aanu caawino waxaa laga yaabaa inay sugaan sannado badan. Sidaa darteed waxaanu kugu dhiiri gelinaynaa inaad ka fekerto dariiqyada kale ee guri helidda.

Is dhaafsi ama kala bedelasho gurigaaga (Qorshe Kala Bedelasho)
Waxaa lagu yaabaa inay uga dhowdahay inaad ku guulaysato inaad guurto haddii aad hesho kirayste kale oo jeclaan lahaa inuu guri kaa bedesho. Gurigaaga waxaad ka bedelan kartaa kirayste kale oo golle maamul degmo ama kirayste urur guriyeed (housing association tenant) oo ah Islington gudaheeda ama meel kale oo ah UK. Si aad u hesho qof aad ka bedelato, waxaa jira labo qorshe oo xayaysiis. Kuwaasi waxay yihiin Homeswapper iyo Smartmove. Homeswapper waxaa wada urur madaxbanaan. Kani waa qorshe xayaysiis oo qaran. Taas oo macnaheedu yahay inaad Islington ka sokow, ka xayaysiin karto qaybaha kale ee United Kingdom. Telefoonka 0845 6066161 ama www.homeswapper.co.uk wixii faahfaahin dheeraad ah
Smartmove waxaa loogu talagalay kiraystayaasha Golaha maamulka ee Islington oo keliya, waxaana ahmiyadeedu tahay kiraystayaasha hantidoodu ka badan tahay (kiraystayaasha haysta qolal hurdo oo ka badan inta ay u baahan yihiin) iyo kiraystayasha guryaha dad ka fara badan ku nool yihiin. Golaha maamulka degmada ee Islington wuxuu xayaysiiyaa dadka gurigoodu ka badn yahay ee doonaya inay sameeyaan kala bedelasho ay ku helaan hanti ka yar, iyadoo ah mid garab socota xayaysiiska Home Connections ee Islington Gazette. Haddii aad hesho qof aad kala bedelataan, waxaad u baahan doontaa inaad ogolaansho ka hesho mulkiilaha hantidaada. Labada dhinacba waxay u baahan doonaan inay buuxiyaan foom dalabasho oo kala bedelasho. Golaha maamulka degmadu waxay haystaan 42 maalmood oo ka bilaabata taariikhda la diiwaan geliyey oo ay kuugu soo sheegaan go’aankooda. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan qorshahan, waxaad ka wac kartaa Kooxda Dib-u guriyeynta telefoonka 020 7527 4140 ama 4143.

Qorshe guriyeyn gabood ah
Guryaha gaboodka ah waxaa s gaar ah loogu habeeyey dadka waayeelka ah (60sano ka eyn) kuwaas oo doonaya inay u noolaadaan si madaxnaan, laakiin haddana doonay amaanka dheeraadka ah ee qorshaha isku dubarida iyo hanaanka gambalaylka khatarta (alarm system) ee guryaha gaboodka ah. Wixii ah caawimo iyo talobixin dheeraad ah ama si aad u dalbato, fadlan kala xidhiidh adeega su’aalaha Dib-u guriyeynta telefoonka 020 7527 4140 ama 4143).

U guuridda guri ka yar (Qorshe cid degan Hanti ka badan)
Qorshahani wuxuu bixiyaa warbixino iyo talooyin kaa caawiya inaad u guurto guri ka yar oo ku haboon baahiyahaaga. Si aad tan u heli karto, waa inaad ahaataa kirayste golaha maamulka degmada (council) ah, aadna ku nooshahay hanti ah labo ama saddex qol oo hurdo, aadna doonayso inaad u guuro hanri ka yar. Haddii aad hadda ku jirto hanti leh afar ama wax ka badan oo qolal hurdo ah, aadna leedahay baahi lagu qiimeeyey hal qol oo hurdo, waxaa laga yaabaa

inaad awoodo inaad haysato mid ka mid ah qolalkaaga dheeraadka ah oo aad xaq u yeelato 2-qol oo hurdo.
Waxaad kale oo helaysaa lacag deeq dheeri oo ah £500 qol walba oo aad ka tanaasusho iyo deeq kaa caawisa kharashka guuritaanka. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan qorshahan, ka wac Kooxda Dib-u guriyeynta telefoonka 020 7527 4140 ama 5174.

Qorshaha lodka cusub
Haddii aad ahayd xubin joogto ah oo guri ka tirsan, kaas oo ahaa kirayste Islington tenant ugu yaraan shan sano, aadna buuxiso shuruudaha guud ee xeerarka qaybinta ee golaha maalmulka degmada, waxaad dalban kartaa qorshahan. Wixii warbixin dheeraad ah, ka wac Kooxda Dib-u guriyeynta telefoonka 020 7527 4140 ama 4143.

Lahaansho la wadaago
Haddii aad doonayso inaad iibsato guri cusub laakiin aadan awoodin inaad u iibsato si toos ah, qorshaha lahaanshaha la wadaago (oo ay sameeyaan ururada guryahu) ayaa laga yaabaa inay awood kuu siiyaan inaad u guurto guri haddii kale qaali aad ah noqon lahaa. Qorshayaashaasu waxay awood kuu siinayaan inaad saami ka iibsato lahaanshaha hanti aadna saamiga hadhayna aad ku bixiso lacagta kirada. Marka aad awoodo, waxaad mar dambe iibsan kartaa saami dheeraad ah, haddii aad sidaa doonayso, waxaad hantida u iibsan kartaa si toos ah.

Hagahaaga bug-yaraha Guryaha
Waxaanu samaynay Hagahaaga buug-yaraha Guryaha si aanu u siino deganashaasa Islington talaobixin la xidhiidha kal doorashooyinka guryaha ee ay heli karaan. Buug-yaraha waxaa ku jira waxrbixino faahfaahsan oo ku saabsan qorshaha kor ku xusan iyo warbixino dheeraad ah oo ku saabsan kiraysiga gaarka ah (private renting), lahaanshaha la wadaago iyo qorshayaasha kale ee guryaha. Waxaad ka hlei kartaa Hagaha bug-yaraha Guryaha bogga internetka ee golaha maamulka degmada ee www.islington.gov.uk/housing/findingahome ama waxaad koobi buug-yaraha ah weydiisan kartaa xafiiska guryaha ee agagaarkaaga.

Ka guuridda iyo dhamaynta kiraysigaaga
Si aad u dhamayso kiraysigaaga, waa inaad na siisaa ogaysiis qoraal ah oo 4 isbuuc ka hor ah, oo dhamaanaya 12ka duhurnimo ee Axadd.
Waa inaad tan u soo dirtaa xafiiska guryaha ee agagaarkaaga.
Haddii laguu bedelay guri kale oo ah Guri-kireeye bulsho oo Diiwaangashan (sida urur guriyeed) adigoo u maray kirayn ah mid kala doorasho ku salaysan (choice-based lettings), waa inaad si dhakhso ah u guurtaa. Xaaladdan kugu khasbi mayno inaad wakhtiga afarta-isbuuc ee ogaysiiska ah, haddii aad furayaasha noo soo celiso marka ay bilaabato kiraysigaaga cusubi.

Marka aad guurto waa inaad:
- Ka qaadaa dhamaan alaabtaada
- Si mas'uuliyad leh uga takhalustaa dhamaan qashinkaaga
- Qorshaysaa in laguu akhruyi saacadaha gaasta iyo korantada aadna xidhaa koontooyinkaaga
- Kaga tagtaa gurigaaga xaalad wanaagsan
- Kaga tagtaa dhamaan waxyaalaha ku degan iyo ku rakiban, kana baabi'isaa wixii hagaajino ah ee aan la ansixin
- Kaga tagtaa daaraddaada ama booska banaanka si nadiif ah oo nadaamsan

Waanu kormeeri doonaa hantida, kuguna soo dalici doonaa wixii kharash ah ee waxyeelo ah ee aan ku imaan duugoow iyo googo Caadi ah oo iskood u yimi iyo nadiifinta wixii qashain ah ee laguu sameeyo. Haddii hantida looga tago si nadiif ah, madhan oo ku sugan xaalad wanaagsan oo dayactir marka aad ka guurto, waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato inaad ku biirto tartan Abaalmarin Cadaalad oo lagu helayo £150.
Waa inaad dhamaan furayaasha ku soo celisaa xafiiska guryaha ee agagaarkaaga maalinta aad guurto ama ugu dambayn 12ka duhurnimo Isniinta ka dambaysa marka kiraysigaagu dhamaado.

Haddii kale waa inaad bixisaa lacagta kirada ee wixii isbuucyo dheeraad ah iyo kharashka ku baxa in aanu hantida galo.

Deganayaal aan sharciyaysnayn ama iska degayaal (squatters)
Marka aad gurigaaga ka guurto, waa in aadan ugu tegin cid kale oo halkaa joogta. Haddii aad sidaa samayso, weli adiga ayaa mas'uul ka ah lacagta kirada. Ciddii guriga sii joogta waxaa laga yaabaa in laga saaro. Maaha inaad siiso ama ka iibiso furayaashaada cid kale. Waa inaad xidhaa oo qafishaa dhamaan daaqadaha iyo albaabada marka aad tagto.

Haddii aad ogtahay qof ku nool hanti uu leeyahay golaha maamula degmadu (council) oo aan ahayn inuu halkaa joogo, fadlan:
Ka wac khadka gaarka ah ee Baadhitaanada arimaha Guryaha 020 7527 7701
Haddii aad aragto qof jabsanaya hanti uu leeyahay golaha maamula degmadu, fadlan wac booliiska isla markaaba.

Badbaadada iyo amaanka gurigaaga
Waxaa jira dariiqyo badan oo aad kor ugu qaadi karto badbaadada iyo amaanka gurigaaga. Qaybtani waxay ku xasuusinaysaa qaar ka mid ah kuwa ugu muhiimsan. Waxay kale oo kuu sheegaysaa baahida ah inaad gasho caymis, waxayna ku siinaysaa warbixino ku saabsan qorshaha caymiska ee kiraystayaasha golaha maamula degmada.

Ka hortaga guri-jabsiga
Xidh dhamaan daaqadaha oo qafil albaabka laga soo galo marka aad baxdo, xitaa haddii ay tahay wakhti gaaban. Tuugada badankeedu waxay dhacdaa maalinimada waxayna qaadataa daqiiqado yar.
Ku rakib daaqadaha qafilo, way jaban yihiin marka loo eego waxyaalaha kale, laakiin waxtar badan ayay leeyihiin. Fadlan hubi meesha ay furayaashu ku sugan yihiin markasta lacala oo ay dhacdo xaalad degdeg ah, sida dab, hubi in daaqadaha dabaqa dhuka iyo daaqadaha u dhow tuubooyin ama saqaf siman habeenkii xidhan yihiin.
Weligaa ha uga tegin furaha kaarbed hoostis ama ha ku xidhan xadhig ka laalaada daloolka warqadaha laga soo tuuro
Ha shaacin inaad meel aadi doonto oo guriga ka maqnaan doonto (tusaale, inaad warqad fariin ah uga tagto dad kuu imaanayey)
Xasuuso inaad joojiso wargeysyo, caano iyo waxyaalaha kale ee laguu keeno marka aad fasax aadayso
Sii booliiska ama deriska/jaaraanka cinwaan ah mid lagala soo xidhiidho wakhtiga aad fasaxa jirto, lacala haddii wax dhacaan inata aad maqan tahay
Had iyo goor weydii dhamaan dadka kuu yimaada inay is caddeeyaan ka hor inta aadan u ogolaan inay soo galaan. dhamaan shaqaalahayaga iyo qandaraaslayaashayadu iyo shaqaalaha ka socda gaasta, korontada ama guddiga biyaha ama booliiska waxay leeyihiin kaadh aqoonsi oo loogu talo galay arintan. Haddii aad ka shakido cid, wac booliiska, had iyo goorna weydii dhamaan dadka kuu yimaada inay is caddeeyaan ka hor inta aadan u ogolaan inay soo galaan
Haddii aad leedahay hanaan lagu soo galo telefoon, si sax ah u isticmaal. Ha u ogolaan cid aadan aqoon inay soo galaan hana xanibin ama mashquulin albaabka isagoo furan
Maaha inaad ku samayso silig amaan albaabka hore ee gurigaaga. Waxay laga yaabaa inay daahiyaan ka baxsigaaga haddii dab qarxo ama ay ka xanibaan dab damiska inay ku badbaadiyaan
Fadlan ogsoonow in aad kirayste ahaan aan laguu ogolayn inaad samayso hagaajino aad ku samayso gurigaaga ogolaanshahayaga la'aantiis. Tan waxaa ku jira ku rakibidda silid amaan oo aad ku rakibto albaabada laga soo galo gurigaaga. Waxaanu ognahay in qaar ka mid ah kiraystayaashu ay tan u sameeyaan sababo amaanka la xidhiidha, laakiin waxaa jira khataro la xidhiidha rakibidda siligyadaa.

Dadka gurigaaga imaanaya
Shaqaalahayaga iyo qandaraaslayaashayadu waxay sitaan kaadh aqoonsi. Haddii qof gurigaaga yimaado, oo kuu sheegto inuu ka socdo HFI, had iyo goor weydii inay is cadeeyaan.

Had iyo goor waa inaad weydiisaa kaadhadhkooda cadaynta dadka sheegta inay ka socdaan gaasta, korontada ama biyaha. Shaqaalaha ka socda adeegyadaasi waa inay sidoo kale awoodaan inay kuu sheegaan lambarka koontadaada. Waxaa lagu muujiyaa biilalkaaga, sidaa darteed mid diyaar ha kuu ahaado.
Marnaba ha u ogollaan in qof soo galo gurigaaga illaa inaad si buuxda ugu qanacsan tahay inay yihiin cidda ay leeyihiin inay yihiin mooyee.
Haddii aad qof ka qobto wax shaki ah, oo ah inaanu dhab ahayn, ha u ogolaan inay soo galaan.
Haddii uu qofka kuu yimi tago marka aad is hortaagto, isla markaaba wac booliiska.
Sarkaalada Ka hortaga Dembiyada ee saldhiga booliiska ee agagaarkaaga ayaa had iyo goor ku faraxsan inay ku siiyaan talobixin dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta gurigaaga. Waxay kale oo kaa caawin karaan haddii aad doonayso inaad samayso Qorshe Ilaalin Xaafaddeed oo aad ka samayso agagaarkaaga. Xasuusnow in talabixintoodu tahay lacag la'aan.

Fasaxyada
Haddii aad fsax u baxayso ama aad gurigaaga isagoo madhan ka maqnaanayso mudo dheer:

- Hubi in gurigaagu uu amaan yahay
- Jooji caanaha, wargeysyada iyo waxyaalaha kale ee laguu keeno
- Qorshe in saaxiib ama qaraabo ay gurigaaga dusha kala socdaan ayna fure haystaan, lacala haddii ay timaada xaalad degdeg ah
- Xasuuso inaad xidho siinta gaasta korontada iyo biyaha

Haddii aad maqnaanayso wax ka badan bil, waa inaad noo sheegtaa ka hor inta aadan tegin
Haddii aad qaadato Gunooyinka deeqaha Guryaha, tan waxaa laga yaabaa inay saamayso maqnaanshahaagu
Haddii aad qorshaynayso inaad maqnaato wax ka badan saddex bilood, waxaad nooga baahanaysaa ogolaansho ka hor inta aadan tegin. Fadlan dalab qoraal ah u samee xafiiska guryaha ee agagaarkaaga. Kiis walba waxaanu uga fiirsanaynaa si gooni ah, laakiin guud ahaan kuma siin doono ogolaansho ah inaad maqnaato wax ka badan 12 bilood.
Sikasta oo ay noqotoba waa inaad na siisaa:

- Taariikhda aad doonayso inaad baxdo
- Taariikhda aad qorshaynayso inaad soo noqoto
- Qorshayaasha aad u samaysay bixinta lacagta kirada iyo daryeelaka hantida (weli xaq uma lihid inaad gurigaaga cid ka sii kirayso adigoo aan ogolaansho qoraal ah naga helin) iyo
- Cinwaanka iyo lambarka telefoonka ee lagaala soo xidhiidhi karo

Caymis
Waxaad mas'uul ka tahay caymis gelinta waxyaalaha gurigaaga yaal.
Waxaad mas'uul ka tahay wixii lumid iyo waxyeelo ah ee ku jimaada gurigaaga ee ay sababtay xaditaan, dab, daadad ama shil.
Waxaanu ku talinaa inaad gasho qorshe caymis guri

- Farniijar iyo waxyaalo ku rakiban
- Alaabta shakhsiyadeed
- Dhar
- Cunto iyo cabitaan
- Waxyaalaha laysku qurxiyo iyo waxyaalaha kale ee qaaliga ah
- Qalabka la soo kiraysto, sida telefishinka

Waa muhiim in shay'ada caymis loo geliyo si qiimahooda oo dhamaystiran ah.
Caymis guri oo buuxa waxaa sidoo kale ku jiri doona daboolid qof saddexaad, haddii qof wax kugu soo dacweeyo. Tusaale, haddii aad ka tagtay khasabad furan ayna biyo soconayaa gaadheen deriskaaga, waxaa laguu qabsan karaa wixii waxyeelo ah ee ka timaada.
Waxaanu si xoog ah ugu talinaa in aad gasho caymis waxyaaaha guriga yaal ah.
Waxaad tan u samayn kartaa adigoo u sii maraya qorshaha golaha maamulka degmada ama inaad samays qorshayaashaada gaarka ah ee caymis.
Golaha maamulka degmadu wuxuu bixiyaa adeeg caymis gaar ah oo ay heli karaan kiraystayaasha golaha maamulka degmadu iyo hanti-kujirayaasha haysta xuquuqda iibsiga, kaas oo siinaya niyad-deganaansho iyo qimo macquul ah.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad hesho warbixino dheeraad ah ama warqad-wareed ama foom hindise, ka wac qorshaha caymiska kiraystayaasha telefoonka 020 7527 2000 ama warqad ugu qor 222 Upper Street, London N1 1XR.
Haddii aad go'aansato inaad qorshayaal gaar ah ka samaysato, shirkaddo gaar ah ama Ururka Caymiska ee Biritishka (British Insurance Association) ayaa talobixin ku siin kara. Waxay istaahishaa in aad qiimayaasha isu eegeegto si aad u hesho heshiiska ugu wanaagsan.

Dhaqamada bulshada dhibka ku ah iyo qashqashaada
Waxaanu ula dhaqanaa dhamaan cabashooyinka ku saabsan dhaqamada bulshada dhibka ku ah si dhab ah. Waxaanu u heelanahay in aanu wax ka qabano, lana shaqayno booliiska iyo ururada kale. Waxaanu samaynay waxyaalo badan oo xaqiiqo ah oo lagu qoray waraaqo iyo warqad-wareedyo oo ku saabsan ASB. Kuwaas waxaa laga heli karaa internet-ka cinwaanka www.homesforislington.org.uk ama xafiiska guryaha ee agagaarkaaga.

Muxuu yahay dhaqan bulshada dhib ku ah?
Dhaqamada bulshada dhibka ku ah waa in loo dhaqmo si keenta ama ay u badan tahay inay sababto qashqashaad, naxdin ama diiqad ay ku keento qof ama dad badan oo hal guri ku wada nool. Waxaa kale oo lagu tilmaami karaa dhaqan si aan munaasib ahayn faragelin ugu sameeya xuquuqda dadka kale ay ku isticmaali karaan gurigooda iyo bulshadooda.

Mas'uuliyadahaaga kirayste ahaan
Waxaad mas'uul ka tahay dhaqamada qof walba, oo ay ku jiraan caruur ee ku nool ama soo booqda hantidaada. Tan waxaa ku jira mas'uuliyad ah sida ay ugu dhaqmayaan hantida dhexdeeda, meelaha la wadaago iyo meelaha hantida agagaarkeeda ah.
Waxaanu kaa qaadi karaa talaabooyin sharci oo badan haddii aad ku kacdo falal ah dhaqamada bulshada dhibka ku ah.

Waxa la samaynayo haddii aad tahay dulmane dhaqamada bulshada dhibka ku ah
Waxaanu kaa filaynaa inaad qaado talaabooyin munaasib ah si aad u xaliso qoor gaar ah oo ka mid ah dhaqamada bulshada dhibka ku ah sida isqabashooyinka deris/jaaraan ka dhex dhacda. Haddii ay jirto dhibaato weyn oo u baahan in aanu soo dhex galo, fadlan xidhiidh xafiiska guryaha ee agagaarkaaga. Wxay awoodi doonaan inay bixiyaan talobixin ayna baadhitaan ku sameeyaan dhibaatada. Waxay go'aan ka gaadhi doonaan waxa ay tahay talaabada la qaadi karo waxayna kula socodsiin doonaan wixii horumar ah ee laga sameeyo.
Haddii aad ka shakido in dhaqamada bulshada dhibka ku ah ay la xidhiidhaan falal dembiyo ah, fadlan la xidhiidh Kooxda Booliiska ee Badbaadada Bulshada (Police Community Safety Team). Haddii ay jirto xaalad degdeg ah wac 999.

Kooxdayada dhaqamada bulshada dhibka ku ah ee saacadaha xafiisyadu xidhan yihiin
Kooxdu waxay ku wareegaan dhismayaasha degsiimada, kana caawiyaan dadka deegaanka ah inay caawimo ka geystaan ka hortaga dembiyada iyo hor istaagidda dhaqamada bulshada dhibka ku ah. Waxay si aad ah ula shaqeeyaan bulshada, waxayna lamaane hawleed la yihiin adeegyada HFI, Booliiska, golaha maamulka degmada ee Islington, Adeegyada Dadka Da'yarta ah iyo ururada kale ee agagaarka, si ay u xaliyaan dhibaatooyinka iyo inay u hawlgalaan markhaatiyo xirfadlayaal ah. Saraakiishu waxay halkan u joogaan inay bixiyaan joogitaan aad u muuqada oo kalsooni gelin leh. Waxay si aad ah ula shaqeeyaan Saraakiisha ASB, ee ka hawlgala meelo la yaqaan oo ay dhaqamada bulshada dhibka ku ah si joogto ah uga dhacaan. Waxay qiimayn karaan oo la socon karaan kiisaska dhaqamada bulshada dhibka ku ah oo ay ku jiraan: Rabshooyinka, Kharibaada, Baabuurta Meelahaas lagaga tago, Waraaqo xayaysiis saaridda iyo Waxyaalaha meelahaas lagu qor-qoro.
Saacadaha lagu wareego dhismayaasha degsiimada ee HFI waa Isniinta illaa Khamiista, laga bilaabo 4 galabnimo illaa 12ka habeenimo iyo Jimcaha iyo Sabtida 5galabnimo illaa 1habeenimo.
Rabshooyinka guryaha dhexdoooda ka dhaca
Rabshada ka dhacda guryaha dhexdooda waa dembi booliiskuna waxay leeyihiin saraakiil si gaar ah loo tababaray oo ku caawiya. Waxay kaloo qaadi karaan talaabooyin ay kugu ilaalinayaan.

Haddii ay jirto xaalad degdeg ah wac 999. Ama waxaad la xidhiidhi kartaa saldhigga booliiska ee agagaarkaaga ama Kooxda Booliiska ee Badbaadada Bulshada.
Haddii laguu geysto rabsho/gacan-qaad ama laguugu hanjabo rabsho/gacan-qaad, waa inaad ugu gudbisaa xafiiska guryaha ee agagaarkaaga sida ugu dakhsaha badan ee suurtagal ah. La taliye Maamulidda Kiraysiga ah ayaa awoodi doona inuu ku siiyo talobixin, qoraal ku sameeyo dhacdada, oo haddii aad codsanayso deegaan xaalad degdeg ah, kuu gudbin doona Xarunta Caawimada Guryaha ee Golaha maamulka degmada (Council's Housing Aid Centre) si aad caawimo uga hesho.
Haddii aanu kugu caawino deegaan ku meel gaadh ah, taa macnaheedu maaha in aau aqbalnay in uu dhaay fal rabshooyinka guryaha dhexdooda ah ama in aanu mas'uul ka nahay in aanu kuu helo guri joogto/wakhti dheer ah. Waxaanu u eegi doonaa xaaladda si taxdar leh, go'aan ku saabsan caawimada mudo dheer ee aanu ku siin karona ku gaadhi doonaa sida ugu dhakhso badan ee suurtogal ah. Tan waxaa ku jiri kara qaadida talaabooyin dheeraad ah oo xagga amaanka ah, si aad ugu noolaato gurigii aad ka tagtay.
Caawimada aanu caawino dulmanayaahs rabshooyinaka guryaha dhexdooda ka dhaca ka sokow, waxaanu kale oo talaabo ka qaadi karaa qofka sababaya rabshadaha. Rabshadaha ka dhaca guryaha dhexdooda maaha wax la qabali karo, waxaanuna beegsanaynaa in dadka rabshoolayaasha ah aanu ka hor istaagno inay ka faa'iidaystaan dhaqankooda. Waxaanu keliya oo talaao qaadi doonaa haddii aad ogolaato, waxayna kaala hadli doonaan talaabada ku haboon.
Haddii qofka rabshada samaynayaa uu isna ku nool yahay hantida, waxay jebinayaan heshiiskoodii kiraysiga, waxaana dhici karta inaanu ka fekerno in aanu ka qaadno talaabo guri-ka saarid ah.

Adeeg Gargaar Guryeed
Adeeg Gargaar Guryeed waxaa loo bixiyaa in laga caawiyo kiraystayaasha laga yaabo inay u baahan yihiin caawimo dheeraad ah, inay wajahaan xaaladdaha sida rabshooyinka guryaha dhexdooda ka dhaca ama guri-ka saarid ay keentay dhaqamada bulshada dhibka ku ah. Kooxaha Maamullidda Kiraysiga, Soo xeraynta Dakhliga ama Dhaqamada Bulshada dhibka ku ah ayaa u gudbin kara Sarkaal Gargaar Guryeed, kiraystayaasha laga yaabo inay jilicsan yihiin oo u baahan yihiin gargaar dheeraad ah. Waxaa iyana jirta dariiq qof isagu ula xidhiidhi karo Adeegga Gargaarka Guryeed, foomkan waxaa laga heli karaa bogga internet-ka ee warbixinta HFI, ka wac Kooxda Dib-u guriyeynta telefoonka 020 7527 4140 ama 4143.

Ka qaybqaadashada samaynta go'aamada
Waxaad xaq u leedahay inaad odhaah ka dhiibato sida gurigaaga loo maamulo. Waxaa laga yaabaa inaad adigu ugu aqoon fiican tahay isbedelada ay wcnaan lahayd in lagu sameeyo dhismahaaga degsiimada oo aad si wadajir la ah kiraystayaasha iyo hanti-ku jirayaasha kale ee degmada gudaheeda aad samayn kartaan go'aano la xidhiidha sida guryahiina loo maamulo oo loo hagaajiyo.

Shakhsi ahaan
Sharci ahaan, waa in aanu kaala tashanaa maadaama aad tahay kirayste ku sugan kiraysi amaan ah, arimaha saamaynaya gurigaaga iyo adeegyad aad hesho. Tan waxaa ku jira:

- Dayactirada ama hagaajinaha gurigaaga
- Isbedelada ku yimaada shuruudahaaga kiraysiga, haddii aad tahay kirayste
- Heerarka adeegyada, iyo
- Hagaajinaha deegaanka, hawlo xagga amaanka ah or qorshayaasha daryeelidda

Waxaan kugu weydiin doonaa waxa ay kula tahay:

- In aanu warqad kuu soo diro
- Kulano aanu qabano
- Xog-ururino aanu samayno
- Daabacidda warqad-wareed saddexdii biloodba mar ah ee kiraystayaasha iyo deganayaasha iyo
- Ula shayqayn aad ah oo aanu la samayno Ururada Kiraystayaahs iyo Deganayaasha (Tenants' and Residents' Associations)

Dhismahaaga degsiimada agagaarkiisa
Dhismayaal degsiimo oo badan ayaa haddaba leh Ururo Kiraysyaal iyo Deganayaal (TRA-yada), kuwaas oo aanu aqoonsanahay.
Waxay dariiq weyn u yihiin kiraystayaashu inay ka qaybqaataan, waana:

- Kulmaan si joogto ah si ay uga wadahadlaan dhibaatooyinka ka jira dhismaha degsiimada
- Kala tashataa HFI barnaamijyada hagaajinta iyo arimaha kale ee waaweyn
- U ololeeyaan hagaajinaha ama waxyaalo cusub oo la sameeyo
- Ka qaybqaataan maamulidda xarumaha bulshada (meeshii ay ka jiraan) waxayna isku dubaridaan hawlaha bulshada
- Metelaan danaha kiraystayaasha iyo hanti-ku jirayaasha ku jira dhisme degsiimo markay tagaan kulanka gudiga guryaha ee xaafadeed

TRA-yada waxaa loo sameeyey sababbo kala duwan. Kiraystayaasha iyo hanti-ku jirayaasha waxaa laga yaabaa inay go'aansadaan inay doonayaan inay odhaah ka badan ka dhiibtaan sida loo sameeyo adeegyada guryaha ama waxaa laga yaabaa inay jirto arin gaar ah, sida amaanka dhisme degsiimo ama shaqo weyn oo ay doonayaan in la xaliyo.
Si si rasmi ah loogu aqoonsado, TRA-yada waa inay u ogolaadaan dhamaan kiraystayaasha iyo hanti-ku jirayaasha inay ka qaybqaataan, ula dhaqmaan qof walba si caddaalad ah ayna yeeshaan doorashooyin joogto ah oo lagu doorto dadka dadka u hogaaminaya ururka. TRA-yo badan ayaa qayb ka ah Isutaga Ururada Islington ee Kiraystayaasha (Federation of Islington Tenants' Associations, FITA), taas oo siisa gargaar TRA-yada hadda jira si ay u sii socdaan. Haddii aad ku nooshahay dabaq yar ama hanti jidka dhinaciisa ku taal, waxaad ku biiri kartaa kiraystayaasha dabaqyada kale ee kuu dhowdhow si aad u samaysaan ururkiina gaarka ah ama ugu biirto TRA ee dhismaha degsiimo ee weyn ee kuugu dhow.
Si aad u hesho warbixino badan, fadlan wac xafiiska guryaha ee agagaarkaaga oo weydiiso inaad la hadasho Sarkaalkaaga Horumarinta Bulshada iyo Adeegga (Community and Service Development Officer).
Dhismayaasha degsiimada qaar ayaa go'aansada inay si ka qoto dheer uga qaybqaataan oo mas'uuliyaddo ka qaadaan maamulka iyo dayactirada maalmeedka ah ee dhismaha degsiimada.si ay tan u sameeyaan, deganayaashu waa inay sameeyaan urur dastuur sax ah leh, Urur Maamullid Kirayste (Tenant Management Organisation, TMO) ayna hantiyaan taageerada inta badan kiraystayaasha iyo deganayaasha dhismaha degsiimada. Golaha maamulka degmadu weli isaga ayaa leh hantida kiraystayaashuna waxay sii lahaanayaan kiraysigooda amaanka ah.
Samaynta TMO badanaa waxay qaadataa 2 illaa 3 sano. Waxaa badanaa la shaqaaleeyaa la-taliye madaxbanaan oo deganayaasha siiya dhamaan talobixinta iyo tababarada ay u baahan yihiin oo ay lacagna ku maalgeliso dawladda dhexe iyo Golaha maamulka degmada ee Islington.

Guryaha gudaha xaafaddaada agagaarkeeda
Waxaa ka jira Islington 4 goobood oo guryaha ah oo xaafadeed, oo mid waliba leeyahay xafiis xaafadeed oo guryo. Goob walba waxay leedahay gudi wada-tashi. Kani wuxuu ka kooban yahay metalayaal laga soo magacaabay ururo kiraystayaal oo laga aqoonsaday agagaarka, sida Ururada Kiraystayaasha iyo Deganayaasha iyo Ururada Maamulidda Kiraystaha. Waxaa kale oo jira, metalayaal kirayste iyo hanti-ku jirayaal oo la soo doortay, oo ka jira dhismayaasha degsiimada, dabaqyada yaryar iyo hantiyaha jidka dhinaciisa ah, kuwaas oo aanu ka jirin wax ururo metelayaal kirayste oo laga sameeyey.
Gudiyada wada-tahsigu waxay si joogto ah ula kulmaan shaqaalaha iyo xubnaha golaha maamulka degmada si ay:

- U helaan warbixino ku saabsan hawl-fulinta
- Wax uga soo jeediyaan ulana socdaan lacagta ku baxayso miisaaniyadda loo qoondeeyey agagaarka
- Caawimo uga geystaan go'aamada in mudnaan la siiyo dayactirada waaweyn ama barnaamijyada hagaajinta
- Wax ka yidhaahdaan warbixinaha aan kama dambaysta ahayn ee guddiga
- Ka wada xaajoodaan wixii dhibaatooyin ah ee la xidhiidha adeega maamulidda guryaha ee agagaarka

Guddigayaga Agaasimayaasha
Homes for Islington waxaa maamula Gudi ah todoba iyo toban Agaasimayaal. Todobo ka mid ah Agaasimayaashaas waa deganayaal, waxaana jira fursado ay deganayaashu ku noqdaan agaasimayaal oo ay uga qaybqaataan go'aan samaynta heerka ugu sareeya

Guddiga:
Dusha kala socdaan Jihada qaab-hawlweeka
Hubiyaan in ururku uu ku sugan yahay inuu buuxiyo Heerka Guryaha Wanaagsan
Hubiyaan ka qaybqaadashada dadka deegaanka ee dhamaan hababka go'aan gaadhidda

Guddi-hoosaadkayaga
Waxaanu kale oo leenahay 2 Gudi-hoosaad oo deganayaashu ay la fadhiistaan Guddiga Agaasimayaasha ee sare. Kiraystayaashu waxay noqon karaan Agaasimayaal la xidhiidhsanayaal kana fekeri doonaan arimaha hawl-fulinta
Guddi-hoosaadku waxay:

- La socon doonaan hawl-fulinta heerka agagaarka
- Isku xidh la samayn doonaan guddiyada agagaarka iyo kooxaha kale ee wada-tashi
- Samayn doonaan qaab-hawleedkayaga ka qaybgalka deganayaasha
- Ra'yi soo jeedin ka geysan doonaan qorshayaasha mustaqbalka ee doorashada Agaasimayaal deganayaal oo qayb ka noqda Guddiga sare iyo Guddi-hoosaadyada, iyo
- Soo jeediyaan barnaamijyada nooca shaqooyinka gacan ku haynta iyo hagaajinaha aanu sannad walba ka samayno degmada gudaheeda

Heshiiska Kiraystayaasha
Waxaanu samaynay Heshiis Kiraystayaal oo Islington. Heshiisku waa isla ogolaansho ka dhexeeya anaga iyo kiraystayaasha, oo ay ku jiraan hanti-ku jirayaasha golaha maamulka degmada. Heshiiska waxaa ku qoran sida aanu ula tashano ugana qayb gelino kiraystayaasha iyo hanti-ku jirayaasha samaynta go'aamada agagaarka ee saameeya guryaha iyo bulshada. Waxaanu samaynay xog kooban oo ah Heshiiska Kiraystayaasha. Si aad u hesho koobi, la xidhiidh xafiiska guryaha ee agagaarkaaga.